| | |
|---|---|
| **Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliiska Minneapolis** | Number: 7-1000 |
| **Mujalladda 7aad – Hawlgallada goobta** | |
| **Dadka Naafada ah oo Aqoonta Luqaddooda Ingiriisiga ay Xaddidantahay** | |

## 7 -1001 Aqoonta Xaddidan ee Luuqadda Ingiriisiga (LEP-ga)

(02/08/96) (12/18/03) (12/05/08) (05/06/15)

(A-D)

### I. Ujeeddo

Ujeedada sharciyadan waa in la dejiyo habraacyo wax ku ool ah, oo waafaqsan Ciwaanka VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 iyo Xeerka Xakamaynta Dembiyada ee Omnibus iyo Xeerka Wadooyinka Badbaadada ah, ee loogu talagalay shaqaalaha Waaxda Bilayska Minneapolis (MPD) inay raacaan marka la siinayo adeegyada, ama la falgalka shakhsiyaadka leh aqoon Ingiriisi oo xaddidan.

MPD-du waxay aqoonsan tahay muhiimadda ay leedahay wada xidhiidhka wax ku ool ah oo sax ah oo u dhexeeya shaqaalaheeda iyo bulshada ay u adeegto. Caqabadaha luuqaddu waxay caqabad ugu noqon karaan isgaarsiinta siyaabo kala duwan. Caqabadaha Luuqadda waxay mararka qaarkood ka horjoogsan karaan ama xitaa ka mamnuuci karaan shakhsiyaadka leh aqoonta Ingiriisiga xaddidani inay galaangal u yeeshaan iyo/ama fahmaan xuquuqaha, waajibaadka iyo adeegyada muhiimka ah, ama in ay si sax ah oo waxtar leh ula xiriiraan xaaladaha adag. Xidhiidhka xumaaday ee dhibbanayaasha LEP-ga ah, markhaantiyada, tuhmanayaasha iyo xubnaha bulshada ayaa MPD u soo bandhigi kara si nabadgelyo leh, caddayn iyo caqabadaha anshaxa, , iyo xaqiijinta awoodda xiriirinta ugu sarreysa ee ka dhaxeysa fulinta sharciga iyo dhammaan qaybaha bulshada waxay u adeegtaa danta labadaba.

### II. Sharciyada/Xeerarka

Waa sharciyada Waaxda Booliiska Minneapolis inay qaado tallaabooyin macquul ah si ay waqti, macne leh u helaan dadka LEP-ga ah adeegyada iyo faa'iidooyinka ay MPD ku bixiso dhammaan barnaamijyada ama hawlaha MPD ay qabato.

**Dhammaan shaqaalaha MPD** waa in ay ugu deeqaan bixinta adeegyada kaalmada Luuqadda shakhsiyaadka ay la kulmaan oo ay aaminsan yihiin inay LEP-ga ahi yihiin, ama mar kasta oo qofka aan ku hadlin afka Ingiriisigga LEP-ga uuna codsado adeegyada kaalmada luuqadda.

**Dhammaan shaqaalaha MPD** waxay ku wargelin doonaan dadweynaha ay la kulmaan in adeegyada kaalmada luuqadda lagu heli karo lacag la'aan marka la isticmaalayo adeeg bixiyayaasha magaalada ee qandaraaska luuqadaha haysta.

## III. Qeexitaanno

**Laba-luuqadood**: Waa awooda isticmaalka labo (2) luuqadood si faseexa ah.

**Turjumidda**: Waa ficilka in lagu dhegeysto isgaadhsiinta hal luuqad (afka asalka ah (source language) iyo taas oo lagu bedelayo luuqad kale (luuqad bartilmaameed ah) iyada oo la sugayo iskumid-ahaanta macnaha.

**Kaarka Aqoonsiga Luuqadda**: Kaararka aqoonsiga luuqadda waxa loo isticmaalaa xaaladdaha fool-ka-foolka ah si loo go'aamiyo luuqadda uu qofku ku hadlayo. Kaarka aqoonsiga luuqadda ayaa taxaya luuqadaha inta badan lagula kulmo Minneapolis. Kaararka Aqoonsiga Luuqadda waa inay si sahal ah u geli karaan shaqaalaha MPD ee wata baabuurta kooxda iyo meelaha/goobaha MPD-da ee ay dadweynuhu ka heli karaan.

**Khadka Luuqadda**: Laynka Luuqadda ee Magaalada Minneapolis waxa uu siiyaa adeegyada afcelineed (tarjumaada) taleefoonka dadka degaanka ah kuwaas oo qaba su'aalo ku saabsan adeegyada iyo hawlaha Magaalada. Khadka Luuqadda waa inaan loo isticmaalin tarjumaada taleefanka ee u dhexeeya booliiska iyo shakhsiyaadka noqda in aysan luuqadda ku hadlin LEP-ga ah.

**Aqoonta Ingiriisiga xaddidan (LEP-ga)**: Wuxuu magacaabayaa shakhsiyaadka afkooda koowaad uusan ahayn Ingiriisigu oo leh awood xaddidan oo ay wax ku akhriyaan, qoraan, ku hadlaan, ama ku fahmaan Ingiriisiga. Shakhsiyaadka LEP-ga ah waxa laga yaabaa in ay aqoon u leeyihiin noocyada isgaadhsiinta (tusaale hadalka ama fahamka), laakiin wali waa LEP-ga ujeedooyin kale (sida akhriska ama qorista). Sidoo kale, qeexida LEP-gu waa xaalad gaar ah. Shakhsigu waxa laga yaabaa inuu lahaado xirfado Luuqadda Ingiriisiga ku filan si uu ugu shaqeeyo hal goob, laakiin waxa laga yaabaa inuu arko in xirfadahani aanay ku filnayn xaaladaha kale.

**Isuduwaha Aqoonta Xaddiddan ee Ingiriisiga (LEP-ga)**: Iskuduwaha LEP-gu waa shaqaale MPD ah kaas oo mas'uul ka ah iskudubaridka dhammaan dhinacyada qorshaha LEP-ga ee MPD si loo hubiyo in galaangal macno leh ay heli karaan shakhsiyaadka LEP-ga iyo, si ay u siiyaan tababar iyo tilmaamo shaqaalaha MPD ku saabsan goorta iyo sida loo helo adeegyada LEP-ga ee shakhsiga LEP-ga ah.

**Hagaha Aqoonta Xaddidan ee Ingiriisiga (LEP-ga):** Hagaha LEP-gu waa dukumeenti loogu talagalay isticmaalka gudaha oo keliya, kaas oo taxaya adeeg iibiyeyaasha magaalada ee qandaraaska haysta oo bixiya adeegyada afcelinta (Turjumaadda hadalka) iyo turjumaada (Qoraalka) MPD. Dukumiintigani waxa uu ka kooban yahay ereybixinta gelitaanka (access codes) iyo macluumaadka ay shaqaaluhu u baahan doonaan si ay u adeeg-iibiyaan boonada biilasha waxaana laga heli karaa MPD Net oo hoos timaada "Buuga iyo Tilmaamaha" ama "Inta Badan La Isticmaalo".

**Luuqadda Aasaasiga ah:** Waxaa loola jeedaa afka hooyo ee qofka ama Luuqadda uu qofku si waxtar leh ugu hadlo.

**Turjumidda:** Waa beddelka qoraalka qoran ee hal luuqad (isha luuqadda) oo lagu beddelayo qoraal qoran ee luuqad kale (luuqad bartilmaameed ah) iyada oo la sii wado macne la mid ah.

## IV. Habraaca / Xeerarka

Adeegyada kaalmada luuqadda ee ay isticmaalaan shaqaalaha MPD waxaa ku jira labadaba turjumaadda wadahadalka qof ahaan iyo tan taleefoon, tarjumaad qoraal, iyo Luuqadda Dhagoolayaasha ee Mareykanka.

### A. Shaqaalaha Booliiska oo u Baahan Adeegyada Turjumaada

1. *Ka jawaabista Masuuliyaddaha Shaqaalaha Booliiska -*

Shaqaalaha booliiska ee goobta jooga ee u baahan adeegyada turjumaada waa inay isku dayaan inay aqoonsadaan Luuqadda aasaasiga ah ee shaqsiga LEP-ga ah iyagoo waydiinaya hadba qofka LEP-ga Luuqadda ay ku hadlaan ama isticmaalaya Kaarka Aqoonsiga Luuqadda. Marka Luuqadda la aqoonsado, shaqaalaha booliisku waa inay la xiriiraan adeeg bixiyaha magaalada sida ku qeexan sharcigaan iyo hagaha LEP-ga kaas oo ku yaal MPD Net ee hoos timaada Buuggaagta iyo Hagahayaasha tixraaca.

2. *Duruufaha Jira*

Duruufaha jira ayaa laga yaabaa inay u baahdaan ka leexashada nidaamka guud ee lagu qeexay sharciygaan/siyaasaddan. Xaaladahan oo kale, shaqaalaha MPD waa inay isticmaalaan turjumaanka ugu kalsoonida badan, si ku meel gaar ah ee hadba la heli karo, sida shaqaale MPD ah, xubin qoyska ka mid ah, saaxiib ama qof goob jooge ah. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah laakiin aan lagu xaddidneyn: baahida loo qabo in la helo macluumaad qeexan oo ku saabsan tuhmanaha baxsadka ah, ama aqoonsiga macluumaadka qofka dhaawacmay. Mar hadii la dhaafo xaaladda adag dhammaan shaqaaluhu waa in ay ku noqdaan habraacyada guud ee dardaarankan.

3. *Qoyska, Asxaabta iyo Goob-joogayaasha*

Marka laga reebo duruufaha adag, shaqaalaha MPD-du waa inay isticmaalaan qoyska, asxaabta ama dadka ag-jooga goobta si ay ugu tarjumaan (hadal ahaan) xaalad aan rasmi ahayn, oo aan iska hor-imaad ahayn, iyo kaliya inay helaan macluumaadka aasaasiga ah marka uu codsado qofka LEP-ga ah. Fiiro gaar ah:

a. Isticmaalka qoyska, asxaabta ama dadka ag-jooggayaasha ah si ay u tarjumaan waxay keeni kartaa jebinta sirta oo aan labixin, iskahorimaadka dano gaar ah, ama fasiraad aan waafi ahayn (fasiraad aan buuxin).

b. Xakamaynta duruufaha adag, shaqaalaha booliisku waa in aanay u isticmaalin carruurta yaryar adeegyada turjubaanka.

c. Marka laga reebo dhaqankan: Qof kasta oo ka mid ah ku suntan shakhsi ahaan LEP-gu waxa uu matali karaa isaga ahaan/iyada ahaan marka uu gudbinayo cabashadiisa muwaadinka. Haddii shaqsiga LEP-ga ahi uu doorto qof aan ahayn adeeg bixiyaha Magaalada, shaqsiga LEP-ga ayaa ka mas'uul ah kharash kasta oo lagu qaado turjubaanka.

*4. Adeegyada Turjumaada Taleefoonka ee Heshiiska/qandaraaska ah*

Adeegyada turjumaada khadka telefoonka ee qandaraaska/heshiiska lagu heshiiyey waa inay diyaar ahaadaan si ay u caawiyaan dhammaan shaqaalaha MPD-da marka ay la falgalayaan shakhsiyaadka ay kooban tahay luuqaddoodu ee LEP-ga ah.

1. Shaqaalaha booliiska ee u baahan adeegyada turjumaada waa in ay isku dayaan in ay aqoonsadaan luuqadda aasaasiga ah ee shaqsiga LEP-ga iyaga oo isticmaalaya kaarka aqoonsiga luuqadda, waana in ay ogeysiiyaan shaqsiga LEP-ga ah in adeegyada turjumaada bilaashka ah ay diyaar yihiin marka la isticmaalayo adeeg bixiyaha Magaalada Minneapolis.

b. Shaqaalaha bilayska ee aaminsan inay u baahan yihiin inay isticmaalaan adeegyada turjubaanka ee khadka telefoonka waa inay la xiriirraan kormeeraha (supervisor) si ay u diyaariyaan isticmaalka telefoonka gacanta, haddii mid loo baahdo. Haddi aanu jirin taleefoonka gacanta oo la isticmaali karo, shaqaalaha booliisku waxa ay u qaadi karaan shakhsiga LEP-ga ah goobta/degmada booliiska ama goob kale ee booliisku leeyahay si ay u isticmaalaan taleefoon.

c. Shaqaalaha bilayska ee u baahan adeegyada turjumaada waa inay tixraacaan Haggaha LEP-da ee ku yaal MPD Net ee hoos yimaada Buug-gacmeedyada iyo Tilmaamaha tixraaca ee adeeg-bixiyaha Magaalada ee gaarka ah si ay u isticmaalaan oo ay u helaan furaha gelitaanka lagama maarmaanka ah.

d. Shaqaalaha booliisku waa inay ku qoraan/diiwaan geliyaan magaca turjubaanka, shirkadda uu ka socdo, iyo taariikhda iyo wakhtiga lala xiriray ee warbixinta baadhista oo ay si gaar ah u caddeeyaan haddii turjubaanka la isticmaalay aanu ahayn adeeg bixiye aan qandaraas ka haysan magaalada.

*5. Adeegyada Turjubaanka fool-ka-foolka ah ee Qofka Qandaraaska Lala Galay*

Adeegyada turjubaanka ee qandaraaska lagu heshiiyey waa in ay diyaar noqdaan si ay u caawiyaan dhammaan shaqaalaha MPD marka loo baahdo la macaamilka shakhsiyaadka LEP-da. Halka adeegyada turjubaanka ee qandaraaska haysta ay heli karaan/diyaar u yihiin dhammaan shaqaalaha bilayska, waxa ay ku habboon tahay waaxyada baarista ee ku shaqeeya xaaladaha aan degdega ahayn, sida waraysiyada dhibbanaha/markhaati iyo su'aalo dembiyeed.

a. Shaqaalaha booliiska ee u baahan adeegyada turjumaada waa in ay isku dayaan in ay aqoonsadaan Luuqadda aasaasiga ah ee shaqsiga LEP-ga ah iyaga oo isticmaalaya kaarka aqoonsiga Luuqadda, waana in ay ogeysiiyaan shaqsiga LEP-ga ah in adeegyada turjumaada bilaashka ah ay diyaar yihiin marka la isticmaalayo adeeg bixiyaha Magaalada Minneapolis.

b. Liiska la oggolaaday oo ah turjubaano imaanaya (fool-ka-fool) qandaraasna u haysta waa in ay adeegsadaan shaqaalaha booliisku si ay u helaan adeegyada turjumaanka fool-ka-fool ee shakhsigu joogo isla goobta. Tixraac Hagaha LEP-ga ee ku yaal MPD Net ee hoos yimaada Buug-gacmeedyada iyo Hagayaasha liiska adeeg bixiyayaasha qandaraaska leh. Turjubaanka goobta imaanaya (fool-ka-fool) ee qandaraaska haystaayi waa inuu joogo goobta wax aan ka badnayn laba (2) saacadood laga bilaabo wakhtiga ogeysiinta adeega.

c. Marka uu yimaado turjubaanku, sarkaalka/kan wax baaraya waa in ay ku qoraan magaca turjubaanka iyo shirkadda uu ka socdo warbixinta baadhista oo ay la socoto imaatinka iyo wakhtiyada bixista turjubaanka iyo qoraalka Luuqadda la turjumayo.

d. Shaqaalaha booliisku waxay weydiin doonaan dhammaan su'aalaha iyo/ama waxay tilmaamo siin doonaan iyagoo adeegsanaya turjumaanka.

e. Marnaba ma aha in turjubaanku si madax-bannaan u weydiiyo shakhsi LEP-ga ah. Doorka turjubaanka waa inuu u adeego sidii dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah, isagoo ka taxadaraya inuusan aragtidiisa gelinin xiriirka ka dhexeeya dhinacyada.

f. Haddii sarkaalka/baaruhu uu aaminsan yahay in ay jirto wax khilaaf ah oo ku saabsan turjumaanka loo xilsaaray, eexda ama sabab kasta oo kale oo loo cudur daaranayo, kormeeraha ugu sarreeya ee goobta jooga waa in lala tashado.

i. Haddii horjoogahaas uu garowsado in welwelku mid run ah, adeegga turjubaanka waxaa la ogeysiin doonaa/lagu wareejin turjumaan kale.

ii. Mar kasta oo ay dhici karto khilaaf maslaxad daneed ama eex dhinaca turjubaanka ah, kormeeraha lala tashaday waa in uu qoraal u gudbiyaa Taliyaha Qaybta iyo Isuduwaha LEP-ga ee waaxda.

6. *Turjumaada Dukumentiyada*

a. Baarayaashu waa in ay suggaan/xifdiyaan adeegyada turjumaada iyada oo loo marayo adeeg bixiyaha magaalada qandaraaska ka haysta, iyaga oo ku xusaya warbixinta baadhista taariikhda, magaca adeegaha turjumidda la isticmaalay iyo dukumiintiga la turjumey.

b. Unugyada haysta dukumeenti u baahan in la tarjumo waa inay la xiriiraan Iskuduwaha LEP-ga kaas oo ku ilaalin doona adeegyada turjumaada adeeg bixiyaha Magaalada. Tixraac ka qaado qaybta E. 2.

**B. Su'aalo, Waraysi iyo Cabashooyin**

1. *Su'aalaha Dembiyada*

Ku guuldareysiga in la ilaaliyo xuquuqda shaqsiyaadka LEP-ga ah inta lagu jiro su'aalaha waxay halis gelineysaa daacadnimada baaritaan kasta. Shaqaalaha booliisku waa in ay gartaan in isfahamka khaldan inta lagu jiro su'aalaha laga yaabo in ay saameyn weyn ku yeelan karto caddaynta lagu soo bandhigo dacwad dambiyeed kasta oo la xiriirta, oo ay si xun u saameyn karto xuquuqda sharciga ah ee tuhmanaha. Sidaa darteed, turjubaano aqoon leh ayaa loo isticmaali doonaa dhammaan su'aalaha dadka LEP-ga ah.

a. Sababta oo ah doorka laba-luuqadlaha ah ee sarkaalka fulinta sharciga ee laba-luuqadlaha ah ayaa laga yaabaa inuu yeesho marka uu qabanayo su'aalaha oo uu u dhaqmayo sidii turjubaan, saraakiisha laba-luuqadlaha ah looma isticmaali karo turjubaano inta lagu jiro baaritaanka.

b. Adeegga turjubaanka qandaraaska haysta, isaga oo jooga waa in loo istcimaalaa sida ku qeexan Hagaha LEP-ga ee laga heli karo MPD Net ee hoos yimaada Buug-gacmeedyada iyo Hagayaasha.

c. Qalab qoraal ah oo muhiim ah ayaa loo heli doonaa tuhmanaha, dhibbanaha ama markhaatiga afkiisa ama afkeeda aasaasiga ah. Haddii foomamka loo baahan yahay aan lagu heli karin Luuqadda aasaasiga ah ee shakhsiga iyo xaaladda aqoon-la'aanta, foomamka waxaa loo akhrin doonaa tuhmanaha, dhibbanaha ama markhaatiga afkiisa ama keeda aasaasiga ah iyadoo la adeegsanayo adeegyada turjumaada ee qandaraaska lagu siiyay.

7. *Wareysiyada Markhaatiga Dembiga*

Xaqiijinta ayaa ah mudnaanta maadaama xaaladahan ay suurtogal tahay inay ku lug yeeshaan arrimo leh qiime caddayn ah oo markhaantiga lagu soo oogi karo maxkamadda. Sidaas awgeed, adeegga turjumaada la aqoosan yahay ayaa la isticmaali karaa marka la qaadanayo bayaan kasta oo rasmi ah ama la qabanayo waraysi kasta, sida lagu qeexay Hagaha LEP-ga ee laga heli karo MPD Net ee hoos yimaada Buug-gacmeedyada iyo Tilmaamayaasha tixraaca.

8. Habka Cabashada ee Dadka LEP-ga ah

Shaqsi kasta oo LEP-ga ah oo raba inuu u gudbiyo cabasho MPD ama Xafiiska Dib u Eegista Anshaxa Booliska (OPCR) ee ku saabsan gelaangal yeelashada Luuqadda ama gudashada waajibaadyada Waaxda, waa in la siiyaa foomamka cabashada oo tarjuman oo afkooda koowaad ah. Shaqaalaha booliisku waxay ka heli karaan MPD Net koobiga elektarooniga ah ee foomamka la turjumay "Foomamka", ama ay u hagi karaan shakhsiga LEP-ga ah shabakadda (website)-ka dadweynaha MPD halkaas oo foomamka laga heli karo "Adeegyada khadka interneetka - ee foomamka la turjumey".

a. Arrimha gudaha ee loo xilsaaray ama xafiiska OPCR-ku waa in ay isticmaalaan adeega turjubaanka goobta imaanaya ee qandaraaska qaatay, sida lagu qeexay sharcigan iyo hagaha LEP-ga.

b. Arrimaha Gudaha ama OPCR waa inay ku bixiyaan ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan habka wax looga qabanayo cabashada LEP-ga ee ku qoran Luuqadda aasaasiga ah ee qofka cabanaya.

## C. Ogeysiinta Dadweynaha ee ku saabsan Waaxda Adeegyada Luuqadda

(05/06/15)

1. Calaamadaha waa in lagu dhejiyaa luuqaddaha ugu badan ee lagu hadlo dhisme kasta oo booliis ah oo si toos ah dadweynuhu u galaan ama barxadda gudaha, oo sheegaya in turjubaano ay lacag la'aan ku heli karaan shakhsiyaadka LEP-ga ah, marka la isticmaalayo adeeg bixiyaha Magaalada ee qandaraas leh.

2. Kaararka Aqoonsiga Luuqadda iyo Ogeysiiska Adeegyada Turjumaada Bilaashka ah waa inay si sahal ah u gaari karaan shaqaalaha MPD ee ka shaqeeya goobaha ay dadweynuhu ka soo galaan iyo baabuur kasta oo MPD ah oo loo isticmaalo in lagu qaado shakhsiyaadka xafiiska MPD, xarumeed ama goobta dembiga.

3. Talisyada guud ee xaafadaha iyo qaybaha sida tooska ah ay dadweynuhu u arkaan waa in ay xaqiijiyaan in calaamaduhu ku dheggan yihiin oo ay arki karaan dadweynaha guud.

4. Qayb kasta ama unug kasta oo MPD-da ah waa in ay hayaan oo ay haystaan daabacaad (koobiyo) nooca adag ka samaysan oo ah foomamka dadweynaha iyo dukumiintiyada la turjumay ee shakhsiyaadka LEP-ga ah. Dukumiintiyadan iyo foomamkaan oo ay la socdaan luuqadaha la heli karo waa in lagu taxxo si qoraal ah (liis-gareeyaa) shabakadda (website)-ka dadweynaha MPD-da ee hoos yimaada Foomamka>Foomamka La turjumey.

**D. Tababarka – Sharciga Caawinta Luuqadda iyo Xirfadaha Turjumaanka** (05/06/15)

1. MPD-du waxay siin doontaa shaqaalaha tababar xiliyeedka ah oo ku saabsan sharciyada Waaxda LEP-da, oo ay ku jiraan sida loo helo taleefoonka iyo turjubaanada shaqsi ahaan imaanayya goobta ee ay ogolaatay waaxdu.

2. MPD-du waa in ay u qabataa tababbarka kuwa cusub ee la qorayo iyo kuwa shaqada ku jira iyo Roll Call ee saraakiisha ugu yaraan labadii (2) sanoba mar.

3. Tababarka waa in marka hore la qabtaa 180 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda dhaqan gal ee awaamiirtan.

**1. Kor-joogteynta iyo Cusboonaysiinta Dadaalka Caawinta Luuqadda**

(05/06/15)

1. **Isuduwaha LEP-ga:**

Taliyaha Booliisku wuxuu magacaabi doonaa Isku-duwaha LEP-ga oo mas'uul ka ah isku-dubbaridka iyo hirgelinta dhammaan dhinacyada xeerarka sharciyada LEP-ga ee MPD-da. Isku-duwaha LEP-ga wuxuu u adeegi doonaa sidii qofka lagala xiriirayo shaqaalaha MPD-da ee su'aalaha ku saabsan ama arrimaha la xiriira bixinta kaalmada Luuqadda ee shakhsiyaadka LEP-ga ah.

2. **Dukumiintiyada:**

a. Iskuduwaha LEP-ga ayaa masuul ka ah marka hore dib u eegista, aqoonsiga iyo kala soocida dhammaan dukumiintiyada MPD-du inay yihiin kuwo muhiim ah ama aan muhiim u ahayn unug kasta, ka dibna sannad kasta dib u eegis ku sameeyo dhammaan dukumiintiyada

cusub ee MPD-du ay bixiso si loo qiimeeyo in loo tixgeliyo dukumiintiyada muhiimka ah iyo in la turjumey.

i. Foomamka and dukumentiyada cusub ee la cusboonaysiiyay waa in si elegtaroonig ah loogu gudbiyaa Isuduwaha LEP-ga kaas oo ku qori doona nambarka foomka MPD-da, ilaalinna doona asalka elegtarooniga ah oo ka baaraandegi doona codsiga si foomamka loo tarjumo.

ii. Cusbooneysiinta iyo abuurista foomamka waa in ay mas'uul ka ahaadaan Unugga isticmaala foomamka.

c. Dhammaan dukumiintiyada la turjumay iyo foomamka waa in looga helaa si elegtaroonig ah shabakadda MPD-da ee dadweynaha.

e. Qaybaha ama Unugyada leh foomamka loo aqoonsaday inay yihiin dukumiinti muhim ah waa inay lahaadaan nuqullo waraaqo ah oo foomamka la turjumay oo ay heli karaan dadweynuhu.

f. Iskuduwaha LEP-ga ayaa mas'uul ka ah inuu la shaqeeyo adeeg bixiyayaasha qandaraalayaasha ah si loogu abuuro afgaradka/koodka gelitaanka dheeraadka ah.

**3. Tababarka:**

Iskuduwaha LEP-gu wuxuu ka caawin doonaa Hogaaminta iyo Horumarinta Ururka horumarinta qorshe cashar oo loogu talagalay tababbarka shaqaalaha MPD-da ee sharciga/xeerka LEP-ga ah iyo sida loo galo loona isticmaalo adeegyada kaalmada Luuqadda.

4. **Uruurinta Xogta Xiriirka LEP-ga:**

Iskuduwaha LEP ayaa mas'uul ka noqon doona ururinta macluumaadka shakhsiyaadka LEP-ga ah ee la soo xiriiray MPD-da. Xogtan waxaa lagu soo uruurin karaa dib u eegista xisaabaadka biilasha ee ay soo gudbiyeen bixiyeyaasha adeegga telefoonka ee qandaraaska ku jira iyo kuwa shaqsiyaadka ah.

5. **Dabagalka iyo Falanqaynta Xogta LEP-ga:**

Madaxa ama qofka loo xilsaaray ayaa mas'uul ka ah qiimeynta xogta tirakoobka si loo hubiyo in MPD-da ay u siiso dadka LEP-ga ah si macno leh adeegyada iyo faa'iidooyinka ay MPD-du ku bixiso dhammaan barnaamijyada ama waxqabadyada MPD-du ay qabato. Qiimayntan iyo la tashigan waa in loo qabtaa iyadoo la isku dubariday Iskuduwaha LEP-ga.